

Barnaamijka tallaalka Soomaaliya waxa lagu dardargaliyay 108,000 oo darsin oo ah tallaalka COVID-19 ee AstraZeneca oo Faransiisku ku deeqay lana soo mariyay COVAX.

Muqdisho: Dawladda Faransiiska ayaa ugu deeqday Soomaaliya 108,000 oo darsin oo tallaalka COVID-19 ee AstraZeneca, si loo xoojiyo barnaamijka tallaalka ee dalka. Deeqdu waxa ay soo gaadhay Garoonka diyaaradaha caalamiga ah ee Aadan Cadde maanta **08 agoosto 2021**.

Daawadan waxa kala wareegtay COVAX global initiative, Wasaaradda Caafimaadka Soomaaliya. COVAX waxa ay la shaqaysaa dawladda iyo warshadaha si loo hubiyo in tallaalka COVID-19 adduunka oo dhan laga heli karo, dalalka dakhliga sarreeya iyo kuwa dakhliga hooseeyana wada heli karaan. COVAX waxa wada hoggaamiya Isbahaysiga Coalition for Epidemic Preparedness Innovations (CEPI), Gavi oo ah Xulafada Tallaalka iyo Ururka Caafimaadka Aduunka (WHO).

108,000 ee darsin waxa ay dardargalinayaan dadaallada tallaalka Soomaaliya oo bilaabmay badhtamihii Maarso 2021, markii uu dalka soo gaadhay tallaalkii ugu horreeyay ee COVAX keento oo dhannaa 300,000 oo darsin oo tallaalka AstraZeneca ee COVID-19 ka ah. Soomaaliya waxa ay qorshaynaysaa in ay u tallaasho shacabkeeda ugu yaraan 20% dhawr qaabood oo kala horreeya. Ugu horraynta waxa awoodda la saarayaa shaqaalaha jiidda hore iyo dadka ugu nugul oo ay ku jiraan dadka da'da ah.

Barbara Nel, Madaxa Afrika ee AstraZeneca ayaa tidhi: “In 108,000 oo darsin oo ah tallaalka COVID-19 ee AstraZeneca soo gaadhaan Muqdisho waxa ay war lagu farxo u tahay shacabka Soomaaliya”

“Dhammaan shaqo wadaagta Isbahaysiga Tallaalku wakhtiga oo dhan waxa ay ka shaqaynayaan sidii ay u hubin lahaayeen in tallaalka COVID-19 gaadho inta ay suurtagal tahay dalalka Afrika. Maanta in uu Soomaaliya soo gaadhay waxa ay muujinaysaa qiimaha wadashaqaynta xukuumadaha, warshadlayda iyo dhinacyada kalaba u leedahay in laga jawaabo baahida dagdagga ah ee qaaradeennan ka jirta”

“AstraZeneca aniga oo u hadlaya, waxa aan jecelahay in aan uga mahadceliyo Wasiirka Caafimaadka Fawsiya Abiikar Nuur, dawladda Faransiiska iyo shaqo wadaagtayada Xulafada COVAX, Ururka Caafimaadka Aduunka, Gavi, CEPI iyo UNICEF suuragalinta hawshan”

“Tallaalka COVID-19 ee AstraZeneca qiyaastii 90% ayuu ka yahay COVAX inta ay bixisay taariikhdan maanta, iyada oo ah in ka badan 80 milyan oo darsin oo la gaadhsiiyay 127 dal, oo ay ku jiraan in ka badan 38 dal oo Afrikaan ah”

“AstraZeneca waxa ka go’an in ay tallaalka u fidiso sida ugu balladhan iyo si sinnaan ah aduunka, oo aan macaash lahayn inta safmarku jiro. Tallaalka COVID-19 ee AstraZeneca wuxu caawiyay badbaadinta tobannaan kun oo nafood iyo ka hortagga in kumannaan kale dhakhtar jiifsadaan tan iyo bilawgii sannadkan”

DHAMMAAD

*

FG Tifaftirayaasha

Dalalkan soo socda ee Afrika waxa ay ka heleen darsinno tallaalka COVID-19 ee AstraZeneca, COVAX iyo dalalka deeqda bixiya tan iyo 1dii May, 2021. Waan idinla wadaagi doonna wararka cusub sida ay kolba noo soo gaadhaan.

Dalka	Darsinnada
Mauritius	38,400
Mauritania	74,400
Botswana	38,400
Namibia	43,200
Rwanda	117,600
Lesotho	36,000
Burkino Faso	115,200
Senegal	184,800
Cabo Verde	31,200
Eswatini	14,400
Kenya	360,000/182,000
Uganda	175,000
Zambia	108,000/120,000
Mozambique	108,000
Ethiopia	391,200
Somalia	108,000
Malawi	192,000
Cote d’Ivoire	268,800